



# Macluumaadka Cusub ee Shaqada Dhismayaasha ee Xagaaga

Qoysaska PPS ee Qaaliga ah,

Inta lagu jiro xagaaga shaqaaluhu waxay ka shaqayn doonaan dugsiyada guud ahaan degmada si wax looga qabto arrimaha la xiriira caafimaadka iyo badbaadada, iyada loo la isticmaalayo lacag laga helay maalgelintii daymeed ee cod bixiyayaashu oggolaadeen Maajo. Isla mar ahaantaana, waxaa socda qorshihii loogu talagalay mashaariicda waaweyn oo dib loogu dhisayo saddex dugsi sare iyo hal dugsiga dhexe ah. Waxaanu rabnaa in aan macluumaad cusub idinka siino waxa soo socda.

## **Caafimaad & Badbaado**

Biyaha – Waxaan raadinaynaa dalabyo ka socda qandaraaslayaasha si ay u bilaabaan bedelaada qaybaha kala ee ay tuubadu biyuhu ka kooban tahay ‘fixtures’, iyada oo mudnaanta la siinayo kuwa ay isticlaamaan ardayda dhigata dugsiga barbaarinta carruurta ‘kindergartners’ ilaa fasalka labaad – kuwaasi oo ah koox halis badan ugu sugaran so gaaridda kiimikada lead. Inkasta oo dugsiyada oo dhan aanay awoodi doonin in ay joojiyaan isticmaalka biyaha sifaysan ‘bottled water’ hada waxaan rajeynaynaa in aad samayno horumar la taaban karo xagaagan.

Asbestos – Mashaariic badan ayay hawhoodu socota si wax looga qabto sagxadaha iyo saqafyada laga yaabo in ay soo gaartay halista kiimikada asbestos, iyada oo culayska la saarayo, fasallada, hoolasha, goobaha wax lugu soo bandhigo iyo qolalka jimicsiga.

Rinjiga – Afar dugsi ayaa heli doona dhamaystirka dib u rinjiyeenta bannaanka -- Astor, Atkinson, Hayhurst iyo Woodstock. Dugsiyadani waxay dhammaantood alwaax ku leeyihiin bannaanka, kuwaasi oo xaalkoodu si shaqso ah u xumaado marka loo eego dhismaha ka samaysan bulukeetiga/jaajuurka ama shubka. Mashaariic kale oo wax lagaga qabanayo soo gaarida rinjiga kiimikada lead ku jirto ayaa mudnaanta la siin doona, iyada oo ay faahfaahin dheeraad ahi soo socoto.

Nidaamka la dejiyay si mudnaanta loo siiyo mashaariicda kale waxaa ka mid ah yaraynta kiimikada radon, gambaleelka badbaadada ee dabka sheega/biyaha wax lagu rusheeyo, xoojinta saqafyada/qlabka dhul gariirka loogu talagalay, wanaajinta soo gelitaanka dhismaha/ADA iyo nidaamyada badbaadada.

## **Casriyeynta Dugsiga**

Maalgelinta daymeed ee la ansixiyey Maajo waxaa ku jira lacag lagu casriyeynayo dugsiyada sare ee Benson, Lincoln iyo Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg.

Si loo go’amiyo sida dhismuhu u soo kala horreeyo, Degmadu waa in ay tiixgelinta siisaadhowr waxyaabood oo kala duwan oo adag, sida; miisaaniyadda mashruuca, naqshada iyo adkaanta dhismaha, helitaanka boos ku meel gaar ah, buux dhaafka iyo saadaasha diiwaan gelinta, diyaar ahaanshaha qorshaha iyo waqtiga, iyo sinnaanta.

Guddiga PPS waxay codsatay kulan shaqo oo la qabto toddobaadyada soo socda si qiimeyn loogu sameeyo fursadaha bannaan ee jira isla markaana go’aan looga gaaro habka ay mashaariicdu iskugu xigayaan. Ujeedadu waa in la kordhiyo tayada isla markaana la yareeyo saameynta uu ku yeelanayo miisaaniyadda, jadwalada mashaariicda iyo tayada.

Waxaan kaliya bilownay shaqadayada ku saabsan maalgelinta daymeed ee 2017-ka, laakiin sidoo kale qoysaska iyo shaqaalaha PPS waan la socodiin doonaa macluumaadka cusub ee dagmadeena ee ku saabsan horumarka la samaynayo.